

Xogo ku saabsan Coronavirus

Toddobaadyada soo socda, wuxuu dhammaanteen waajib naga saaran yahay inaan gacan ka geysanno joojinta faafitaanka cudurka Coronavirus (COVID-19).

1. Sidaas darteed Maamul-goboleedka Brandenburg wuxuu go'aansaday:

• In la xiro dhammaan xarumaha aan nololmaalmeedka lagama maarmaanka u ahayn. Shirkadaha adeegga ee daryeelka shaqsiyeed (tusaale ahaan timo-jareyaasha iyo goobaha is-qurxinta) waa in la xiraa. Goobaha cuntada bisil waa inay xirnaadaan. Dalabaadka guryaha laysugu geeyo ama guryaha in lagu cuno loo qaato waa la oggolyahay. Subarmaarket-yada iyo dukaamanka nolol-maameelda iyo kuwa cabitaannada way furnaanayaan. Sidoo kale Suuqyada toddobaadleyaasha way furnaanayaan.

Intaas marka laga soo tago waxaa kaloo furnaanaya;

- Farmashiyeyaasha
 - Meelaha daawooyinka
 - Kaalimaha shidaalka
 - Bangiyada iyo Bangiyada dhigaalka
 - Boostooyinka
 - Goobaha Nadaafadda iyo dhar-dhaqista
 - Dukaamanka qalabka dhismaha
 - Xarumaha dhaqaatiirta iyo Isbitaallada
 - Bakhaarrada qalabka caafimaadka
 - libka joornaallada
-
- Isku imaanshaha in ka badan laba qofood gabi ahaan waa la mamnuucay. Waxaan dadkaas ku jirin qoysaska iyo kuwa hal guri ku wada-nool.
 - Taabashada dadka aan is-aqoonin waa in illaa heerka ugu hooseeya la yareeyaa. Goobaha bulshada waa in masaafo 1.50-mitir ah ay isku jirsadaan dadka. Meelaha wax lagu sugo lama oggola in 10 qof ka badan ay markiiba joogaan.

Waa mamnuuc gelista goobaha dadweynaha (sida. Jidadka, waddooyinka, barxadaha, aagagga gaadiidka iyo xadiiqooyinka) illaa laga gaarayo saqda dhaxe ee 5-ta April, 2020.

Goobaha dadweynaha waxaa loo oggol-yahay kaliya sababaha soo socda:

- Dukaameysi ama waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka u ah daryeelka shaqsiyga ah.
- Booqashada dhakhtarka iyo daryeelka caafimaadka
- Tegista Dhakhtarka dhimirka ama Jimicsiga caafimaadka jirka haddii caafimaad ahaan si degdeg ah loogu baahan yahay
- Booqashada lammaanaha nolosha, dadka da'da ah ama dadka xanuunsanaya
- Raacista dadka baaritaannada u baahan iyo carruurta.
- Raacista meydadka qoysaska kuu dhow iyo aaska
- Isboortiga iyo luga-baxsiga hawo soo qaadashada (sida ugu fiican israaca laba qof ama dadka guriga kugala nool)
- Ballamaha deg-degga loogu baahan yahay ee xafiisyada dowliga ah, maxkamadaha iyo qareennada.

- Waxaa sidoo kale ku jira qaadashada lacagaha jeegga ah iyo ceyrta ee Sooshiyaalka ama hay'adda bulshada.

2. Sidee baan ku qaadi karaa Fayruska?

Fayruska waxaa la isugu gudbiyaa qof ka qof. Is-qaadsiinta waxay ku dhacdaa qunfac, hadal ama marka qof uu gacan-qaado qof kale.

3. Maxaan sameyn karaa, si aniga ama dadka kale aanay u qaadin Fayruska?

- Si joogta ah gacmaha u wada dhaqo (Carruurta iyo da'yarta xitaa)
- Ku qunfac ama ku hindhis kaliya madiil ama xusulka oo laaban (Carruurta iyo da'yarta xitaa)
- Wajiga gacmaha haku taaban
- In si joogto ah qolkeyga/halka aan ku noolahay aan u nadiifiyo
- Weelka, macalgooyinka iyo fargeetooyinka inaan dad kale la wadaagin
- Inaan yareeyo xiriirka dadka si kasta ay macquul ku tahay. Tani waxay quseysaa goobaha dadweynaha iyo xitaa nolosha gaarka ah
- Taabashada jireed in illaa heerka ugu hooseeya la yareeyo (Ka fogow gacan-qaadka, dhunkashada iyo laab-is-galinta toddobaadyada soo socda)
- Dukaameysiga ama gaadiidka dadweynaha masaafo 1.5 mitir ah u jirso dadka kale.

4. Sidoo qofku ku garan karaa inuu Fayruska qabo?

Marka qofku uu qaado Fayruska Corona, tusaale wuu qunfacayaa, wuu diifayaa, dhuuntaa xanuuneysa ama wuu qandhanayaa. Wuxuu aad ugu eg-yahay hergabka. Dadka qaar way shubmayaana. Bukaannada qaar way ka daran yihiin kuwa kale; neefta ayay ku dhibtoonayaan ama sambabada ayaa caabuqaya. Marka qofka Fayruska uu qaado 14 cisho ayay qaadan kartaa inay ka soo muuqdaan calaamadaha xanuunka.

5. Maxaan sameynayaa marka calaamadaha xanuunka aan isku arko?

Fadlan dhakhtarka ha aadin! La xiriir cidda mas'uulka ka ah halka aad deggan tahay ama shaqaalaha arrimaha bulshada (Sooshiyaalka) ee muhaajiriinta.

Kadib cidda qaabilsan howshaas ayaa lala xiriirayaa. Haddii aad Jarmal ku hadasho, fadlan wac

- dhaqtarkaaga gaarka ah
- Ama garaac 116 -117 (Taleefoon lambarka adeegga daryeelka caafimaad ee deg-degga ah).

6. Maxaan laygugu oggoleyn inaan ka boxo qofkeyga/ kaamka/ gurigeyga?

Marka cudurka uu ku haayo ama shaki uu jiro inaad qaadday, waxaad galeysaa karantiil ama go'doomin. Illaa inta aad cudurka dadka kale qaadsiin karto waxaa ku qabanaya sharci qaas ah si dadka kale loo ilaaliyo. Lama oggola muddo inaad ka baxdo goobta laguugu karantiilay illaa ay oggolaadaan maamulka halka aad deggan tahay. Wax kasta oo aad u baahan tahay qolkaaga ayaa laguugu keeni doonaa.